K

## Akhbaar Taageeraysa/faahfaahinaysa Kaarka Natiijada iskuulada

**Marka ay caruurtu dhamaystaan Faslada Xanaanada, ardayda SPPS waxay barandoonaan:**

Saint Paul Public Schools — A World of Opportunities

## LUUQADADA IYO SUUGAANTA

- Akhri oo faham qoraallo kala duwan maalin kasta keligaa ama dad kale la wadaag siyaalo kala duwan (si aad jeceshahay, danaynayso, amo aqoon korodhsi).
- Weydii oo ka jawaab wax ku saabsan waxa aad akhrinayso, sheeg jilayaasha iyo dhacdooyinka, iyo adiga oo tafaasiisha la wadaag iyadoo lagu kaalmaynayo.
- Isku xir erayada iyo sawirrada si aad u fahamto waxa horay loo akhriyay iyo erayada cusub.
- Sheeg sida ay isku mid ku yihiin ama ku kala duwanyihiin dhacdooyinka, matalayaasha, iyo qoraaladu, adigoo lagu caawinayo.
- Baro oo qor xafaha dhan, xarafka iyo dhawaaqiisana isku xir, ogowna inay erayada lagu hadlo la qoro iyadoo xarfaha la adeegsanayo.
- Sheeg, sawir, oo qor fikrado, sheekooyin, iyo macluumaadka—xooji qoraalkaaga adigoo kaalmo helaya.
- Xusuusta oo wadaaga macluumaadka iyo tijaabooyinka.
- Ku biir sheekaysi, wadaaga afkaar, una jawaab dadka kale weedho dhammaystiran.
- Xarafka u horreeya weynee weedh kasta oo magic u yeel calamaadda uu ku dhamaado.
- Qor xarfaha dhawaaqa shibbanayaasha iyo shaqalada gaaban
- Barashada isticmaalka erayo cusub iyo erayo macne badan xambaarsan.

## XISAABTA

- Akhriska qoraalka iyo isbarbardhiga lambarada 0 ilaa 31
- Tirinta ayadoo walxo la isticmaalayo iyo ayadoo aan la isticmaalaynba, oo horay iyo gadaal loo tiriyo ugu yaraan 20
- I nay soo saaraan lambar 1 ka badan labarka la siiyey ama 1 ka yar lambarka lagu siiyey.
- Isticmaalka walxaha iyo masawirada la sawiro si la isugu daro oo loo kala jaro lambarada u dhexeeya 0 ilaa 10
- Aqoonsiga iyo curinta hanaanka isticmaalka qaababka, midabka, baaxada, dhawaqa lambarada iyo dhaqdhaqaaqa
- Kala soocitaanka walxaha iyadoo la qaababka sida sadex jibaaranaha, toobinka, dhululubada, iyo isfeerka.
- Aqoonsashada shaxamada laba-qaablayaasha ah sida labajibaaranaha, goobada, sadex xagalka, laydiyaasha, trapezoids iyo lixgeeslayaasha.
- Aqoonsashada shaxamada sadex-bararlaha ah sida sadexjibaaranaha, toobinka, dhulubada, iyo isfeerka.
- Isticmaalka kalmadaha si la isku barbardhigo walxaha ayadoo loo eegayo baaxadooda (culayska, kaladheeraanshaha, iyo dherarka, iwm.)
- Fahamka iyo isticmaalka kalmadaha sida ku xiga, hoos, kor, kadambeeya.

## SAYNISKA

- Isticmaalka sawirada iyo erayada luuqada si loo qeexo waxayaabah loo jeedo oo la isu barbar dhigo waxyaabihii loo fiirsaday iyo qeexaha kuwa kale.
- Kala saaritaanka walxaha laba qaybood loo kala sooco taas oo ay ku jiraan ku-jiraan waxyaabaha ilaahay abuuray iyo kuwa dadku sameey: wax nool iyo wax aan noolayn; hab dabiici ah oo ilaahay sameeyey iyo habka dadku sameeyey.
- Isticmaal foojignaantaada maalin laha ah ee la xiriirta cimilada si aad u qeexdo sida cimilada iyo xiligu isku badalayaan.
- Walxaha oo lagu kala saaro midabka, baaxada, qaabka, iyo waxyaabaha isku dhafan ee ay ka koobanyihiin iyo sharaxaada sababayntooda la xiriirta habka ay loo kala saaray.
- Eeg oo isbarbardhig geedaha iyo xayawaanka kala duwan oo sheeq qaybahooda duleed. Tusaale ahaan madaxyada, lugaha, dhegaha, dadka iyo xayawaanka; ubaxa, jiridaha, xididada, ee geeda badan
- Kalasaar waxyaabaha nool iyo waxyaabaha aan noolayn.

## CILMIGA BULSHADA

- Fahamka qawaaniinta wanaagsan, qofnimada wanaagsan, dhaarta qaranka iyo Madaxwaynaha
- Fahamka bucshirada, adeegyada, kala barashada rabitaanka iyo baahida
- Famhamka qaabka meelaha kala duwan, maababka iyo dunidaba
- Fahamka wakhtiga, qoysaska iyo siyaabaha aan wax uga ogaan karo wakhtiyadii la soo dhaafay

## CAAFIMAADKA

- Inay gartaan istaraatiijiyadha la la xiriira dhinaca maskaxda, maanka (emotional), iyo caafimaadka bulsho,
- Inay fahmaan habka jirka bani aadamku u shaqeeyo, koritaanka bani aadamka,
- Inay la socdaan caafimaadka iyo fayada maskaxda, dabeecada, iyo nafaqada iyo tusmooyinka caafimaadka.
- Inay Fahmann Badbaadadooda iyo arimahu ku tacaluga arimaha la xirlira caafimaadka bay'ada.

## MUUQAALKA IYO HABKA GUDASHADA HAWLAHA FARSHAXANKA

- Sahaminta fanka maqalka iyo muuqaalka ah ee lagu soo bandhigayo fariimo isgaarsiinta xambaarsan.
- Ciyaarta oo curinta muusiga iyadoo la isticmaalayo laxan sahlan oo lagu codaynayo
- Hanaanka ciyaarta muusiga oo lagu soo celcelinayo iyadoo la isticmaalayo nooc ka mid ah qoob ka ciyaarka.
- Boro oo aqoonso waxyaabaha tiyaatarku ka koobanyahay.

## TACLIINTA JIRDHISKA

- Inay sameeyaan dhaqdhaqaaqyo iyo istaraatiijiyo looga baahanyanay dhaqdhaqaaqyada jirka ee kala duwan.
- Inay si joogtaagt ah uga qaybgalaan hawlaha jirdhiska oo xoog leh.
- Inay gaaraan oo joogteeyaan heer caafimaad oo ku filan.
- Inay muujiyaan oo soo bandhigaan musuuliyad xaga shakhsiga ah ama bulshada oo dhan khusaysa bulshada oo dhan.
- Inay dhaqdhaqaaqa jirka u qiimeeyaan side caafimaadka shakhisga, ku raaxaystaan oo ay la halgamaan.